



Warbixinta guddiga: Siyaasadda diiwaannada dadweynaha u furan oo ay ku socoto ballaarin weyn

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay qaateen siyaasad faahfaahsan oo diiwaanada laga dhigayo kuwo dadweynuhu heli karaan.

Kulankeedii Luulyo 18, Guddiga Waxbarashada PPS waxay si buuxda u ansixiyeen qaraarka 5682, kaasi oo lagu oggolaaday in ballaarin weyn lagu sameeyo siyaasadda degmada ee loogu talagalay qabashada hawsha codsiyada diiwaannada dadweynaha u furan.

“Waxaan rajeynayaa in arrintani ay keento dareen weyn oo ku aadan dhanka daahfurnaanta oo loogu talagalay degmada isla markaana ay dadku si wanaagsan u qaadan doonaan,” ayay sheegtay Rita Moore, oo ka shaqeysay Siyaasadda Guddiga iyo Guddiga Maamulka.

Cod bixintu waxay soo afjartay nidaam dheer oo ay ku jiraan wax ka bedel badan oo lagu sameeyay siyaasadda, taasi oo asal ahaan la qabatimay 1980 isla markaana wax laga bedelay 1984 iyo 2002. [Qaybtii u dambaysay ee siyaasadda](#) waxay dhanayd 144 eray, oo leh saddex qaybood. Dib u eegidu waxay siyaasadda dhererkeeda ka dhigtay 10 qaybood oo mid kastaa ka kooban tahay 762 eray.

Siyaasadda dib u eegida lagu sameeyay waxaa lagu daray qaybo ku saabsan qabashada hawsha macluumaadka xasaasiga ah ee, shaqsi ama gaarka ah ee xubnaha shaqaalaha, iyo qabashada hawsha diiwaannada ee loo tixgelin kara kuwo sharciga gobolku uu gaar yeelayo.

Siyaasaddu waxay mamnuucaysaa aargoosiga ka dhanka qof kasta oo codsada diiwaannada dadweynaha u furan ama faylasha rafcaanka. Waxay ku dareysaa mid la kala dooranayo oo ah inaad racfaan ka qaadato go'aanka adiga oo u gudbinaya Guddiga halkii aad uga gudbin lahayd Xafiiska Qareenka ee Degaanka Multnomah, iyada oo kala doorashada lagu qeexay sharciga gobolka isaga oo ah mid la heli karo.

“Rafcaanka guddiga dugsigu bixiyo iyo fursad dheeraad oo laga yaabo inay noqdaan mid ay heli karaan waalidiinta iyo bulshadu,” ayay sheegtay Guddoomiyaha Guddiga Julia Brim-Edwards ee xilka ka tagaysa.

Cod bixintu waxay soo gunaanaday nidaam dheer oo shaqo oo ku saabsan siyaasadda oo bilaabmay xagaagii la soo dhaafay, iyada oo talo laga helay xubnaha bulshada ka tirsan iyo Bulshada Suxufiyiinta ee Xirfadda leh taasi oo keentay isbedel. Siyaasadda waxaa loo soo saaray in ay marka hore Guddiga oo buuxda akhrido Simtambar 26, laakiin dib ayaa loo dhigay ilaa iyo degmadu ay heshiis cusub oo la gaaraysay Ururka Macallimiinta ee Portland. Siyaasadda waxaa akhriskeedii u horreeyay lagu sameeyay kulankii Guddiga ee Febraayo 27, iyo laba isbedel markii ugu horeysay la akhriyey Juun 12.

[\(Akhri siyaasadda buuxda ee diiwaannada dadweynaha u furan\)](#)

Tallaabada kale ee Guddiga:

- Rita Moore waxaa si buuxda loogu coddeeyay in ay noqoto Guddoomiyaha Guddiga, iyada oo Julia Esparza Brown loo coddeeyay in ay noqoto Guddoomiye Ku-xigeenka. Moore waxay markii u horreysay iyada oo ah guddoomiye ka soo muuqan doontaa kulanka Guddiga, Talaadada, Luulyo 24.
- Iyada oo lagu ansixiyay cod gaaraya 7-0, Guddigu waxay ansixisay Qaraarka 5683, kaas oo lagu qaatay siyaasadda waxbarashada dhanka galmada oo dhammeystiran ee K-12 oo loogu talagalay PPS. [\(Akhri siyaasadda buuxda\)](#)
- Guddiga waxay dhageysatay soo jeedinta [qorshaha weyn ee dib loogu dhisayo Dugsiga Sare ee Lincoln](#).
- Samaax Noor, oo dhawaan ka qalin jebisay Dugsiga Sare ee Madison, ayaa la siiyay abaalmarinta Guddiga ee Deeqda Waxbarasho. Abaalmarinta waxaa sanad kasta la siiyaa arday sanadkii u dambeeyay dugsiga dhigta (inkasta oo Noor ka qalin jebisay sannad hore, ka dib sanadkeedii saddexaad) waxaa loo xushay xirfad waxbarasho waxayna dhigan doontaa jaamacad dadweyne. Noor waxay dhigan doontaa Jaamacadda Gobolka Portland.